

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Waqtiga Casarka ah.

وَالْعَصْرِ

2. In Dadku khasaaro ku suganyahay.

إِنَّا لِلَّهِ إِنْسَانٌ لَفِي ضَلَالٍ مُّبِينٍ

3. Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee Camal fiican fala, isuna dardaarma xaqa, isuna dardaarma Samirka.


إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَّصُوا

بِالْحَقِّ وَتَوَّصُوا بِالصَّبْرِ

Suuraddani waa Suurad gaaban, haseyeeshee aad u wayn, waxayna caddaysay in Dadku khasaaray wixii ka soo hadhay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna la yimid.wanaaggana is faray.Samirkana isu dardaarmay.

Dhabaraani wuxuu ka wariyay Cubaydullaahi Binu Xafse inuu yidhi : Laba ruux oo asxaabtii rasuulka ka mid ah waxay ahaayeen hadday kulmaan inayn kala tagin isagoon midkood akhriyin suuraddan ilaa dhammadkeeda markaasay isa salaami jireen.

Imaamu Shaaficina wuxuu Yidhi Eeba ha ka raalii noqdee : Dadku Hadday Suuraddan Fiiriyaan way u waasac noqon lahayd (ku fillaan lahayd). Al-Caṣr (1-3).



Suurat Al-Humazah

سُورَةُ الْهُمَزَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Halaag Wuxuu u Sugnaaday xanle wax ceebeeya oo Dhan,

وَبِئْسَ لِكُلِّ هُمْزَةٍ لَعْنَةٌ

2. Oo Xoolaha kulmiya (xaqana ku bixinin).

الَّذِي جَمَعَ مَا لَا وَعَدَّدَهُ

3. Ma wuxuu u malayn in xoolihiisu waarin.

يَحْسَبُ أَنَّ مَالَهُ أَخْلَدَهُ

4. Saas ma aha ee waxaa lagu tuuri (Naarta) Xudhama.

كَلَّا لَيُنْبَذَنَّ فِي الْحُطَمَةِ

5. Ma taqaannaa Xudhama.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْحُطَمَةُ

6. Waa Naarta Eebe ee la huriyay.

نَارُ اللَّهِ الْمَوْجُودَةُ

7. Gubaysana Quluubta (Kulayl dar-tiis).

الَّتِي تَطَّلِعُ عَلَى الْأَفْئِدَةِ ﴿٧﴾

8. Waana lagu dabooli Naartaas Gaalada.

إِنَّمَا عَلَّمَتْهُمْ قُوصِدَةً ﴿٨﴾

9. Tiirar la fidiyay yayna ahaan dhex-deeda.

فِي عَمَدٍ مُّمَدَّدَةٍ ﴿٩﴾

Xanta, Dadkoo la xaqiro oo la yaso, Xoolahoo la kulmiyo oon xaqa lagu bixinin waa arrimo xun Ruuxii ku kacana sabab ugu noqota Naar galiddeed, saa daraaddeed waa in layska jiraa xumaanaha la soo sheegay, illeen xan wax kuuma qabato, Xoolana kuma waariyaan. Al-Humazah (1-9).



Suurat Al-Fiil

سُورَةُ الْفِيلِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ma Ogtahay sida Eeba ku falay asa-xaabtii Maroodiga «Colkii».

أَلَمْ تَرَ كَيْفَ فَعَلَ رَبُّكَ بِأَصْحَابِ الْفِيلِ ﴿١﴾

2. Miyaan Eebe ka yeelin dhagartoodii wax dhumay.

أَلَمْ يَجْعَلْ كَيْدَهُمْ فِي تَضَلُّلٍ ﴿٢﴾

3. Oosan ku dirin korkooda Shimbiro kooxa ah.

وَأَرْسَلَ عَلَيْهِمْ طَيْرًا أَبَابِيلَ ﴿٣﴾

4. Kuna tuuraysa Dhagaxyo la kululeeyay.

تَرْمِيهِمْ بِحِجَارَةٍ مِّن سِجِّيلٍ ﴿٤﴾

5. Markaas Eebe ka yeelay Bal la daaqy sidiis.

فَجَعَلَهُمْ كَعَصْفٍ مَّأْكُولٍ ﴿٥﴾

Suuraddani waxay ka warrami Arrin dhacday Nabiga dhalashaddiisii wax yar ka hor, (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) oo ah in Gaal Xabashi ah Yaman ka soo duulay si uu u soo dumiyo kacbada Sharafta leh, markuu Maka ku soo dhawyahayna Eebe ku sii daayay Shimbiro Dhagaxyo ku tuuri Colkiina saa ku jabay, kacbadiina nabadgashay. Arrintaasu la yaab ma leh, Maxaa yelay Eebe isagaa awood leh, immisayse dhacday wax shimbiro ka yar intay wax halaageen. Al-Fiil (1-5).